JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 4AAD, 2016

# AF-SOOMAALI

2016

GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA

SomExams

**Wadarta Guud**

**Magaca** ..........................................................

**Dugsiga**..........................................................

**Roll No** ..........................................................

# Jamhuuriyadda Somaliland

## Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare

## Gudiga Imtixaanaadka Qaranka

## Fasalka 4-aad

# AF-SOOMAALI

**2015-2016**

**Waqtiga 2 saacadood**

**10 daqiiqo oo dheeraad ah ku akhri dhammaan qaybaha imtixaanka si aad u hubiso.**

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay **13** bog oo daabacan.
Tiri oo wargeli hor-joogaha haddii ay wax ka maqan yihiin ama ay dheeraad yihiin.

| | | |
|---|---|---|
| QAYBTA 1-AAD: | Sheeko | 25 Dhibcood |
| QAYBTA 2-AAD: | Humaagyo iyo Heeso-hawleedyo | 27 Dhibcood |
| QAYBTA 3-AAD: | Maanso iyo Maahmaahyo | 18 Dhibcood |
| QAYBTA 4-AAD: | Naxwe | 10 Dhibcood |
| QAYBTA 5-AAD: | Curis | 20 Dhibcood |
| | **Dhibcaha Guud** | **100 Dhibcood** |

- Ka Jawaab su'aalaha dhamaantood
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah

## Qaybta 1-aad: Sheeko

**Akhri sheekadan oo fahan dulucdeeda ka dibna ka jawaab weydiimaha ka danbeeya.**

## HAWL IYO HOGO KALIILEED

Waxa ay ahayd diraac aad u kululayd markii uu Naalleeye oo xiddigiye weyn ahaa malluugaha jeedaaliyey. Waxa uu arkay saadaashii oo aad u fiican yididiilana ka muuqato, waxa kale oo uu arkaayey cirka oo af kurubadleynaya ,dayaxii oo kal galay,laxihii oo goor hore dhacay iyo waaq habaarkii oo janjeedhsaday. Waxaanu maskaxda ku hayey dhirta qaarkeed oo xilli magooshay.

Xoolaha oo xilligaas ishinka iyo adhiguba sid gooyey; ayaa Naalleeye werwer weyn ku hayey, hase ahaatee habeenkaas ayaa ay yididiilo weyni kashiisa gashay. Maxaa yeelay xilli gu iyo ifafaalihiisii ayaa u muuqday. Geelu maalintaas waa uu cokonaa adhigana kalkiisii baa ay ahayd.

Hiirtii waaberi markii uu ooggu istaagay ayaa uu adhigii afsaarka ka tuuray oo inta uu xayeeshidii xerada ku reebay,wixii xoogga lahaa marada u riday. Maalintii oo dhan dhalan dhool buu ahaa, habeenkiina guul ooman baa uu galay. Subaxdii dambe markii nin iyo geed la kala gartay ayaa uu oodda ka rogay oo inantii ku yidhi: “Aabbe waan sii ceelalyo tegayaa ee adhiga soo kaxee oo geedkii qudhaca ahaa ee weynaa ku soo hagaaji”.

Tallaabada waxa uu hoosta ka xadaba, ceelkii oo maax geliyey ayaa uu isku tuuray. Markiiba weelkii ayaa uu darka ku teediyey, wadaantiina moolka ayaa uu ku shalwiyey. Kolkii uu yeelkii oo dhan buuxiyey ayaa inta uu wadaantii ceelka ku riday dawliska caaradiisii dambena xakabka ku xidhay, ayaa uu tuur yar oo u dhawayd isku taagay oo yidhi: “Cibaadoy Aabbe adhiga soo hor”. Barqo gaaban intii aan la gaadhin ayaa adhigii kamiin iyo rakaadba hamuun gooyey. Hase ahaatee adhigii neefaf ka mid ah ayaa kawkabay oo darkii ka kici waayey.

Maalintaas oo dhan waxa uu adhigii kawkabay baxnaaniyaba, casar gaaban ayaa uu fuliyey. Habeenkaas meel dheer carraabe kuma geynine guul cokon ayaa uu sii gebegebe fadhiisiyey. Waa lexejeclo iyo caadadeede, habeenkaas il iyo baalkeed isuma keenin. Waagu markii uu walalac yidhi ayaa uu dhabada cagta u saaray. Dharaartaas oo dhan waxa uu sii wadoba gabbaldhac markii ay ahayd ayaa uu reerkii usha la dhigay. Habeenkaas sidii uu filayey ayaa ay raxmadi afarta jihoba ka hillaacday. Inkasta oo uu daal iyo dekaan qabay, haddana Naalleeye ma seexan oo habeenkaas oo dhan hillaadis iyo odoros ayaa uu ku soo jeeday. Geela oo deegaan raaca lagu yaqaan ayaa isaguna markii uu hillaacii arkay in uu oodda jebiyo u kankaansaday (holoday).

Waaberigii markii indhaha la kala qaaday ayaa uu Naalleeye inta uu labo halaad oo dhaqayo ahaa sii finnaaqsaday, in uu sahamiyo weysada u buuxsaday.

Meesha reerku yaalay iyo halka uu roobku ku soo simay waxa u dhexeysay suun abaar ahayd oo aanay xooluhu geed sare iyo mid hoose toona saxar ka goynayn (daaqayn).

Waxa uu sii socdaba, waxa uu hanfi kaliileed iyo halas abaareed sii jiidhaba, gelinkii dambe ayaa uu dhul mahiigaan ku yuurursaday oo ay xareeddu gal iyo gelgelinba buuxisay ku soo baxay. Naalleeye inkasta oo uu harraad baxay haddana gaajo darteed ayaa ay bogga iyo beerku isku dhegeen. Gabbalkuna waxa uu ugu dumay gegi cidla ah iyo gudcur roobabow oo aan waxba la arkayn. Waxa uu iska masanuun socdaba oog la shiday ayaa meel dheer uga bidhaantay. Inta ay neefi ka soo kudday ayaa uu ku dhaqaaqay isaga oo aan cagaha qaadi karaynin. Waxa uu soo qarda jeexaba, markii uu meeshii oogtu ka baxaysay ku dhawaaday ayaa uu koortii geela iyo jabaq kale maqlay.

Cabbaar haddii uu soo shanqadh dhegeystay, waxa uu ku soo baxay gole koox dhalinyaro ahayd waalo ku ciyaaraysay oo ay ku cawaynaysay. "waar nabad ma la sheegay?" ayaa uu yidhi. "waa nabad ee adigu maxaa aad sheegtay?" ayaa ay uga celiyeen. Kolkaas ayaa uu yidhi: "Shil la'aan".Intaa markii la isweydaarsaday ayaa uu ninkii ragga ugu weynaa, inamadii la hadlay oo yidhi; "waar diif iyo diihaal baa ninka ka muuqda ee kaca oo geela soo godla, ninka caano ha looga lisee". Markiiba laba halaad oo isku sidkanaa ayaa la iska daba godlay oo gaawe labo nin deeq ahaa laga soo buuxiyey. Aroortii dambe, markii uu geelii ka sii caano dhamay, ayaa inta uu guri sii qormaystay xaggii reerkiisa ku toosay. Maalintii oo dhan kabti iyo kaynaan wax uu ahaadoba, makhribkii markii xoolaha usha laga dhigay ayaa uu yimid.

Habeenkaas gataatidhac baa uu ahaa oo dhinacii uu u jiifsaday marna iskama rogin. Waagu markii uu beryey ayaa raggii beesha u talin jiray oo dhami gurigii Naalleeye mid mid ugu soo kallaheen si ay u wareystaan. "waa sidaa iyo sidii xumeyd la'aw" markii la isku celceliyey ayaa waa inoo caawa iyo geeddi lagu guddoonsaday. Xiddigta waaberi markii ay bidh soo tidhi ayaa kheyr raro iyo ka rayso xoolihii lagu dareeriyey. Meesi kastana hees u gaar ah ayaa lagu haloosiyey.

Maalintii oo dhan wax maalin sawaal la ahaadaba, casar dheer ayaa uu gurigii Naalleeye sii laansaaray. Isla markiiba hawshii degista ayaa qof waliba meeshii uu kaga habboonaa kaga hagaagay. Haweenkii aqalladii baa ay mid kastaaba qormadii loo qayday ka dhistay. Naalleeye iyo wiilkiisii Cartanna inta ay gudimooyinkii iyo hangoolladii la boodeen ayaa ay yagleel u dhaqaaqeen. Dhowr cisho ka dibba xoolihii barqo dhereg baa ay ahaayeen. Caanuhuna dhiil iyo dheriba ay ku baryeen.


SLNECB©2016

**B. Goobaab jawaabta saxda ah:** **(20-dhibcood)**

1. Xilliga lagu jiray waxa uu ahaa:
   b. dirir
   t. dayr
   j. diraac
   x. dambarsame

2. Adhigu marka uu biyaha aad u cabbo ee uu ku bukoodo waxa loo yaqaan:
   b. waa uu ganac go'ay
   t. waa uu caadooday
   j. waa uu kaalufay
   x. waa uu kawkabay

3. Biyaha dhexdooda waxa loo yaqaan:
   b. mool
   t. mood
   j. maax
   x. miid

4. Xayeeshidu waa:
   b. xoolaha waa weyn
   t. xoolaha la iibsado
   j. xoolaha irmaan
   x. xoolaha itaalka daran

5. Ereyga saadaalin waxa kale oo la mid ah:
   b. faallo
   t. faaqidaad
   j. odoros
   x. bilkeedin

6. Ciyaaraha fadhiga lagu ciyaaro waxa ka mid ah:
   b. walasiqo
   t. wareegto
   j. wilwilo
   x. waalo

7. Ishinka waxa ka mid ah:
   b. adhiga
   t. ugaadha
   j. idaha
   x. geela

8. Maalintaasi waxa ay ahayd:
   b. kalkii geela
   t. kalkii adhiga
   j. kalkii lo'da
   x. intaba

9. Naalleeye gurigii waxa uu sii laansaaray:
   b. barqo dheer
   t. casar dheer
   j. goor dheer
   x. midna

10. Naalleeye waxa loo godlay:
   b. geel dhaqayo ah
   t. sac dhalay
   j. labo halaad oo isku sidkan
   x. intaba

11. Waagu markii uu beryey gurigii Naalleeye waxa yimid:
   b. haweenkii reeraha
   t. geeljirihii
   j. raggii beesha u talin jiray
   x. midna

12. Haweenkii aqalladii waxa ay ka dhiseen:
   b. keyntii
   t. dooxooyinkii
   j. bannaanadii
   x. qormadii loo qeyday

13. Reerihii waxa la raray:
   b. xiddigta waaberi markii ay soo baxday
   t. cadceedu markii ay soo baxday
   j. martii dhexe
   x. markii ooggu istaagay

14. Naalleeye maalintii oo dhan waxa uu ahaa:
   b. kallahaad iyo kabti
   t. kabti iyo kadaloob
   j. kabti iyo kuftin
   x. kabti iyo keynaan

15. Xereda cusub ee xoolaha loo oodo waxa loo yaqaan
    b. guricas
    t. jabad
    j. yagleel
    x. tuuyo-fadhiisi

16. Qofku marka uu seexdo isaga oo daalan waxa loo yaqaan
    b. gataatidhac
    t. hiirdays
    j. qaadiro
    x. intaba

17. Naalleeye waxa uu sii jiidhay
    b. habaas
    t. hanfi kaliileed iyo halas abaareed
    j. hadimo iyo hagardaamo
    x. intaba

18. Geelu waxa uu oodda jebiyaa
    b. marka uu arko roobka ugu horreeya hillaaciisa
    t. marka uu arko colka
    j. marka uu awrka
    x. intaba

19. "Cirka oo af-kurubadlaynaya" waxa looga jeedaa
    b. tiix yar oo aan biyo dhig lahayn
    t. qabow iyo ceeryaan
    j. dhedo iyo sayax
    x. midna

20. Xooluhu marka ugu horraysa eeay biyaha uu afka saaraan iyo marka labaad ee ay ku soo noqdaan waxa loo yaqaan
    b. hormo
    t. kamiin iyo rakaad
    j. darjiidh
    x. kawkab

**T.Qor macnaha ereyadan:** (5-dhibcood)

1. Malluugaha.......................................................................................
2. Afsaar...............................................................................................
3. Moolka..............................................................................................
4. Xayeeshi...........................................................................................
5. Maalinsawaal.....................................................................................

## Qaybta 2-aad: Humaagyo iyo heeso-hawleedyo

### B. Humaagyo

**Ka bixi hal tusaale oo tix ah xubnahan afka maldahan ee hoos ku xusan mid kasta.**

1. Lagaaddo (3-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

2. Silansugan (3-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

3. Qofayn (2-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

4. Buunbuunin (3-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

5. Xus (2-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

6. Shareere (2-dhibcood)

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

..........................................................................................................................

## T. Heeso-hawleedyo

**Ku hor qor heeso-hawleedyo ku saabsan mawduucyadan hoos ku xusan mid kasta.**

1. Geela: (2-dhibcood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

2. Lo'da: (2-dhicood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

3. Adhiga: (2-dhibcood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

4. Dhaanka: (2-dhibcood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

5. Beeraha: (2-dhibcood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................

6. Haanta caanaha: (2-dhibcood)

.......................................................................................................................
.......................................................................................................................
.......................................................................................................................



SLNECB©2016

## Qaybta 3-aad: Maanso iyo Maahmaaho

### B. Maanso

1. Dusha midabka soomaalibaad dugulka moodaaye
   Misana laguma diirsado ee qalbigu waa dirkii karale
   b. Falanqee dulucda macne ee meerisyadan? (2-dhibcood)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

2. Garre iyo guntane maalintay gees isugu booday
   b. Maxaa uu uga jeedaa garre iyo guntane gabayaagu? (1-dhibic)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   t. Faahfaahin ka bixi maalinta uu gabayaagu ku sheegay tuducan?(1-dhibic)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

3. Xoolaha markay timid ninkaan xulayey geelayga
   j. Faallo ka bixi dulucda macne ee meeriskan? (2-dhibcood)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

4. Haddii reer isguursaday ciyoon guulle inan siiyo
   Galladii adoogii hadduu qayb ka gudiwaayo
   In la gooni dayrshaa markaa saw gar noqon mayso

   Goblantooy hadday baallinimo gooni la ahaato
   Gaaridu ma buuqdee hadday waano geli weydo
   In uu meherka gooyaa markaa sow gar noqon mayso
   b. Fallanqee wiilka iyo gabadhu waxa ay midaysan yihiin? (2dhibcood)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

6. Xusuuso heestii hoobal ka dibna tax shaqsiyaadka uu ku xusay abwaanku? (1-dhibic)

   ..................................................................................................

   ..................................................................................................

b. Sheeg sababta uu u xusay abwaanku shaqsiyaadkaa? (1-dhibic)

..........................................................................................................

..........................................................................................................

**T.Maahmaaho**

1. Labo biyo hoostood iska haraatiday iyaga ayaa iska kaa og

   b. Fallanqee dulucda maahmaahdan? (2-dhibcood)

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

2. Ninna korkiisa biyo kama hagrado
   Xiniini xigaalkeedbay eedday

   b. Faaqid kala duwanaanshaha labadan maahmaahood? (2-dhibcood)

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

   t. Si kooban u sheeg dulucda maahmaahda hore? (2-dhibcood)

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

   j.Sheeg xilliga la adeegsado maahmaahda labaad? (2-dhibcood)

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

..........................................................................................................

## Qaybta 4-aad: Naxwe

**Goobaab jawaabta saxda ah:** **(10-dhibcood)**

1. Ereygu waxa ka kooban yahay
b. xarfo isu tegey
t. weedho isu tegey
j. ereyo isu tegey
x. xarfo iyo ereyo

2. Weedh dhiman iyo weedh dhan waxa u dhexeeya
b. weedhaha oo kala badan
t. macne dhiman iyo macne dhan
j. macne kooban iyo mid fidsan
x. macne qoto dheer iyo mid fudud.

3. Falku waa erey hogaamiya
b. sifada weedha
t. isku xidha weedho dhaadheer
j. weedha
x. laamaha weedha

4. Meeleeyuhu waa
b. ka,la iyo soo
t. ga,ta iyo ka
j. soo,ta iyo ka
x. sii,ga iyo ta

5.Falkaabe waa erey
b. ku lid ah falka
t. caawiya falka
j. ka horreeya magaca
x. ugu dambeeya weedha markasta

6. Magacu guud ahaan waxa uu u qaybsamaa
b. saddex nooc
t. labo nooc
j. hal nooc
x. afar nooc


SLNECB©2016

7. Magac u-yaalku waxa uu gala
b. kaalinta falka
t. kaalinta layeelaha
j. kaalinta magaca
x. kaalinta sifada

8. Ereyga qodobka ahi waxa uu gala
b. dhammaadka magaca
t. bilowga magaca
j. dhexda magaca
x. waa horgale

9. Ereyga sifo waxa uu wax ka sheegaa
b. magac u-yaalka oo qudha
t. magaca
j. falka
x. falkaabka

10. Yeeluhu waa
b. waxa weedhu ku dhammaato
t. qodob
j. waxa weedhu wax ka sheegayso
x. ku dhammaato

**Qaybta 5-aad: Curis** **( 20-dhibcood)**

b. Mid ka dooro labadan qodob kadibna ka qor curis ka kooban ugu yaraan (200) oo erey.
1. Hooyada
2. Tahriibka/Suudalka

..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................
..........................................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

...............................................................................................

**Dhammaad**



SLNECB©2016